CCA/04/21 Tr: 06/2/2021

**W A R-S A X A A F A D E E D**

Musharax Madaxweyne Cumar Cabdulaqaadir Axmedfiqi wuxuu halkan soo jeedinayaa war saxaafadeedka hoos ku xusan:

1- In Saamilayda siyaasadda Soomaaliya ay talo midaysan go'aan uga gaaran arimaha masiiriga ah, ee loo baahanyahay, si loo badbaadiyo Dadka, Diinta iyo Dalka. siguna yimaadaan shir deg deg ah.
2- Musharaxu wuxuu uga digayaa xubnaha Baarlamaanka ee waqtigoodii dhammaaday inay Dastuurka Dalka baal maraan , oo ay waqti kordhin u sameeyaan Madaxweyneha waqtigiisu dhammaaday, taasoo Waddanka u horseedi karta qalaalse siyaasadeed iyo Dagaal sokeeye. Sidoo kale wuxuu Musharaxu ugu baaqayaa xubnaha baarlamaanku inay ku noqtaan degaan doorashadoodii.
3- Musharax Madaxweyne Cumar Cabdulaqaadir Axmedfiqi wuxuu ka codsanayaa Beesha caalamka inay soo farogeliso xaaladda siyaasaddeed ee Dalka, si looga hortago Inqilaab siyaasadeed oo sababa Dagaal sokeeye.
4- Musharax u wuxuu ugu baaqayaa Odeyaasha dhaqanka inay qaataan kaalintooda muhiim ka ah, maadaama ay yihiiin gundiga Dowladnimada Soomaaliyeed, soona xuleen ergooyinkii soo doortay Baarlamaanka, haddana looga fadhiyo inay qayb-libaax ka qaataan badbaadinta Ummadda.
5- Musharaxu wuxuu ku baraarujinayaa Ciidamada qalabka sida, inay yihiin ciidamo Qaran, loogana baahanyahay inaysan amar danbe ka qaadan Xukuumadda iyo Madaxweynaha waqti- xileedkoodii dhammaaday, kuwaas oon haysan sharciyad ee

Waddanka ku xukumaan. Musharaxu wuxuu sidoo kale ku wargelinayaa Ciidamada Qaranka inay xeryohooda ku ekaadaan, shacabkana la shaqeeyaan.

6- Musharu wuxuu caddaynayaa in tallaabo kasta, oo ay qaaddo Dowladda waqtigoodu dhammaaday ay tahay sharci darro, dadweynha Soomaaliyeedna aysan aqbali doonin.

7- Musharaxu wuxuu ka codsanaysaa shacabka Soomaaliyeed, qaas ahaan kuwooda Muqdisho ku nool inaysan la shaqayn, canshuurna siinin, kana horyimaadaan Dawladda waqtigeedii dhammaaday ee kalitalisku uu hogaamiyo.

Ugu dambayn wuxuu Musharaxu ugu baaqayaa shacabka Soomaaliyeed inay u diyaar garoobaan inaan waddankeena ka badbaadsanno maamulka waqtigiisu dhammaaday ee kalitiliska ah, ayna la socdaan baaqayada ka soo bixi doona mas'uuliyiinta kale ee Dalka.